

Xiriirada Seattle DCI

Si aad talooyin u samayso:
U dir waraaq Seattle DCI, Public Resource Center (PRC), Suite 2000, P.O. Box 34019, Seattle, WA 98124-4019, ama iimayl u dir PRC ee prc@seattle.gov. Talooyinka waa inay ahaadaan qaab qoraal ah.

Si aad u hesho ogaysiis shacab ee MUP dalabyo, go'aano, iyo kulanno:

Waxaad booqataa boggayaga Land Use Information Bulletin (LUIB): <http://web6.seattle.gov/dpd/luib/>. LUIB waxaa la daabacaa Isniinta illaa Khamiista. Waad is qori kartaa si aad u hesho digniin iimayl laba jeer-usbuucii marka LUIB la soo saaro. Waxaad kaloo isku qori kartaa xog-quudinta RSS.

Jawaabaha su'aalaha isticmaalka dhulka:

- Su'aalaha guud ee aaga la xiriira fadlan wac Xarunta Isha Shacabka ee Seattle DCI (Seattle DCI's Public Resource Center) ee (206) 684-8467 una dhaaf fariin faahfaahsan ama u dir iimayl ku socda prc@seattle.gov.
- Akhbaarta goobta-gaarka ah ee aaga Halka Qoys (Single Family), fadlan wac Xarunta Adeegyada Dalbadaha ee Seattle DCI (Seattle DCI's Applicant Services Center) ee (206) 684-8850.
- Ugu wacnaanshaha adkaanshaha Xeerka Istimalka Dhulka ee Seattle, dhammaan akhbaarta kale ee aagaynta waa inuu qofka si shaqsi ah u yimaadaa Xaruntayada Adeegyada Dalbadaha (Applicant Services Center) (ASC). ASC waxay ku taalaa Dabaqa 20aad ee Seattle Municipal Tower, 700 5th Avenue. Waxaa kaloo su'aalo ku soo gudbin kartaa adigoo isticmaalaya boggayaga internetka Istimalka Dhulka ee Adeega Su'aal iyo Jawaab (Q&A Service) ee <http://web6.seattle.gov/dpd/LUQA/?Type=1>.

Akhbaarta dhismaha, maababka, iyo diiwaanda taariikheed:

Istimalka Adeegyada bogga internetka ee www.seattle.gov/dpd/toolsresources/ ama booqo PRC oo ku taala dabaqa 20aad ee Seattle Municipal Tower, 700 5th Avenue.

Si aad ula socoto ogolaansho:

Istimalka Adeegyada bogga internetka ee www.seattle.gov/dpd/toolsresources/ si aad ula socoto meesha ay marayso ogolaansho.

Qorsheeyayaasha Seattle DCI waxay si taxadar leh u eegaan talooyinka bulshada inta ka horaysa go'aan soo saaristooda.

Waa maxay racfaanada?

Mashaariicda badankooda ee u baahan in summadahooda la soo dhejiyo waxaa ku jiraysa fursad racfaan looga qaadanayo go'aanka Seattle DCI. Racfaan waa fursad aad uga doodi karto go'aanka Seattle DCI adigoo aan maxkamad tegin. Akhbaarta ku saabsan sida racfaan loo xareeyo waxuu la socdaa ogaysiiska go'aanka. (Racfaanada badankooda waxaa dhagaysta Eegaha Dhagaysiga Magaalada (City Hearing Examiner)). Akhbaar faahfaahsan ee sida looga xareeyo racfaan Gud-diga Dhagaysiga Shoreline waxaad ka heli kartaa Wareegtada Caawinta Macaamilaha 232 (Tip 232), *Sida Racfaan looga qaato Ogolaanshaha, Sharuud ku-xirnaanta ama Diidmada Ogolaanshaha ee Shoreline (How to Appeal the Granting, Conditioning or Denial of Shoreline Permits)*.

Waxii Racfaanka ka Dambeeya

Haddii mid ka mid ah labada dhinac ee racfaanka qaatay aysan ogalaanin natiijada, go'aanka racfaanka waxaa la gayn karaa maxkamad.



dadka deriska ee OGAADAY

Tusaha Seattle DCI's ee Ogaysiisyada Deriskaaga iyo Talooyinkooda

Maxay Aniga iiga Macno Tahay Summadaha Ogaysiiska Isticmaalka Dhulka ee Seattle?

Markaad dhisme ku aragto summada Seattle DCI, u tixgeli sidii inay tahay casuumad ka qayb qaadashada horumarka bulshadaada! Waxaa lagugu casuumay inaad ka talo bixiso soo bandhigyada mashaariicda horumarinta ee lagu sharxay ogaysiisyadeena bulshada.

- Summado waawayn ee cadcad ayaa la soo dhejiyaa marka mashruuc baaxadiisa ay keento dib-u-eegis saamayn wayn ku yeelan karta degaanka (taasoo loo yaqaano dub-u-eegista SEPA).
- Summad jaale ah oo cabbirkeedu yahay 18- iyo 24- hiish ayaa lagu soo dhejiyaa mashaariicda kale ee Isticmaalka Dhulka, oo ay ku jirto shirarka bulshada, is-bedelada, isticmaalada sharuudaha ku xiran, mashaariicda dhulxeeboodka badankooda, iyo mashaariicda yaryar ee qaybo-hoosaadyada.
- Milkiilayaasha ama kiraysteyaasha ku dhegan meeshaas waxaa dhici karta inay ku helaan boostada ogaysiis dalabaadyo gaar ah.

Fadlan ogoow mashaariic tiro badan uma baahna ogaysiis bulsho. Mashaariicdan ma ay yeelan doonaan summado la soo dhejiyo mana ay yeelan doonaan muddo looga talo bixiyo ama fursad racfaan qaadasho.



Yaa ka talo bixin kara?

Qof walba! Degganayaasha, ardayda, shaqaalaha, iyo milkiilayaasha rugaha ganacsiga—qof walba oo dareema in mashruuca la soo bandhigay uu saamayn ku yeelan doono.

Sababtee ayaad u Raadinaysaa Talooyinka Bulshada?

Magaalada waxay ogaatay in dadka ay leeyihiin aqoon gaar ah ee ku saabsan degaanka ay ku nool yihiin ama ka shaqeeyaan. Ujeedada loo aruuriyay talooyinka waxay tahay in laga caawiyoo Seattle DCI inay qeexaan dhibaatooyinka waawayn isla markaana xal u raadiyaan iyagoo ku jira gudaha xadka sharci ee uu xeerku u sameeyay.

Goorma ayaa Talooyinka la Samayn Karaa?

Summadaha isticmaalka dhulka iyo ogaysiisyada kale waxay si cad u sheegayaan taariikhda biloowga ama dhammaadka muddada talooyinka ee la sharciyeeyay. Sida caadiga ah Seattle DCI waxay ku qaadataa in ka dheer muddada loo cayimay inay go'aan kama dambays ah ku sameeyaan. Seattle DCI waxay tixgelinaysaa talo walba ee la bixiyay ka hor inta aysan go'aan samayn, iyadoo aan u eegayn haddii ay dhacdo inta lagu jiro muddada sharciga ee talo bixinta. Laakiin, soo gudbinta talooyinkaaga waqti hore waa habka keliya ee aad ku hubin karto inaan waqti u heli doono tixgelinta talooyinkaaga ka hor inta aynan go'aan samayn.

Talooyinkee Ayaa la Tixgelinayaa?

Seattle DCI waxay tixgelinaysaa oo keliya talooyinka ka soo baxa sharuudahii lagu qeexay xeerka

Isticmaalka Dhulka. Talooyinka la xiriira saamaynta mashruuca ee qiimaha dhismayaasha ama argiyooyinka gaarka ah lama eegayo. Hoos waxaa ku yaala tusaale noocyada walaacyada ee la tixgelinayo mashaariicda kala duwan. Meelaha qaarkood mashruuca waxaa ku jiri kara in ka badan hal mid ee qaybahan hoos ku qoran.

SEPA (State Environmental Policy Act): Siyaasadahan waxay ilaaliyaan degaankeena dabiiciga ah, oo ay ku jirto: dhulka, biyaha, hawada, dhirta aan inta badan la heli karin, iyo xayawaanka khatarta ku jira. Siyaasadaha waxay kaloo waja-hayaan degaanka la dhisay sida jidadka baabuurta, iftiinka iyo wirwirka. Sharciga SEPA waxuu leeyahay 19 nooc oo siyaasadahan. Waxaad heli kartaa nuqulka Seattle DCI ama booqo bogga www.seattle.gov/dpd/codesrules/codes/ (ku xiriirsan hoosta xeerarka xiriirka-isticmaalka Dhulka).

Dhulxeebeedka: Dhulxeebeedka agagaarka goobaha waawayn ee biyaha waxuu u baahan yahay fiirin dheeraad ah si loo ilaaliyo tayada biyaha, degaanka, isticmaalada biyaha-ku-tiirsan, aragtida shicibka; iyo si loo horumariyo helitaanka bulshada ee biyaha.

Kala duwanaanshaha: Kala duwanaanshaha waa loo baahan yahay marka ay xaalad gaar ah ay ka hor imaanayso horumarinta la-qabsiga xeerka. Shanta walxood ee lagu qiimaynayo codsiga kala duwanaanshaha waa 1) xaaladaha aan caadiga ahayn ee dhismaha taasoo ka hor is-taagaysa milkiilaha inuu dhismahiisa horumariyo; 2) haddii kala duwanaanshaha uu meel fog gaarayo; 3) ogolaanshaha kala duwanaanshaha kuma keenayo dhaawac jireed ama si qaldan uma dhaawacayo dabeecada degaanka; 4) haddii aan la ogolaan kala duwanaanshaha waxuu abuuri karaa xaalado adag ama dhibaato jireed; iyo 5) ogolaanshaha kala duwanaanshaha waxay joogto ula haysataa ujeedada Xeerka Isticmaalka Dhulka.



Sidee ayaan u Samayn Karaa Talooyin Waxtar leh?

- Si kooban u sharax qofka aad tahay iyo sababta aad u xiisaynayso mashruucan?
- Dib-u-eeg faylka mashruuca iyo qorshayaashiisa.
- U sharax arrimaha uu walaacaaga khuseeyo si cad oo kooban.
- Sheeg fikradahaaga iyo waxyaalaha aad door bidayso, soona jeedi xalal kale ee arrimahaas gaarka ah.
- Waydii daraasadaha aad u malayn karto inay muhiim yihiin ee aan laakiin lagu siin.
- Bixi akhbaartaada gaarka ah.
- Caddee qaybaha mashruuca ee aad jeceshahay kuwaasoo aad qabto inaan la bedelin.
- Ka talo bixi sida mashruuca loo raacay ee xagga Xeerka Isticmaalka Dhulka.
- Bixi cinwaankaaga waraaqaha USPS si aanu kuu ogaysiino go'aanada iyo/ama shirarka shacabka.

Isticmaalo Maamul oo Sharuudo ku xiran: Isticmaalada la oggol yahay ee meelaha qaarkood haddii ay la kulmaan xaaladaha gaarka ah. Xaaladahan waxay ku saabsan yihiin saamaynta sida qaylada, urka, qashinka, wirwirka iftiinka, meelaha baabuurta la dhigto, ama baabuurta. Xaaladan waxaa dhici karta inay wajahdo isticmaalada, sida xadidida isticmaalada goobaha degaanada ee goobaha culus ee ganacsiga ama aaga warshadaha si looga hortago iska hor-imaad.

Dib-u-eegida Naqshadda: Dib-u-eegida naqshadda waxay eegaysaa muuqaalka dhisme ee dhismaha iyo sida uu ula xiriirayo agagaarkiisa, oo ay ku jirto cabirka iyo qaabka guud ee dhismaha, qaabaynta dhulkiisa, iyo alaabtiisa. Walaacyada deegaanka, sida saamaynta baabuurta iyo goobta baabuurta la dhigto, dib-u-eegida naqshadda ma ay eegayso arrintan. Dib-u-eegista naqshadda loogama baahna dhammaan mashaariicda oo idil waxaana lagu caddeeyay xeerka isticmaalka dhulka.

Maxaa Keeni Kara Kulan Bulsho?

Mashaariicda qaar waxay u baahan yihiin kulan bulsho oo qayb ka ah habka dib-u-eegista. Kulana-da kale ee bulshada waxaa la qaban karaa marka ay Seattle DCI codsi ka hesho ugu yaraan 50 qof. Ogaysiiska shirarka bulshada waxaa lagu daabacayaa Joornaalka Akhbaarta ee Isticmaalka Dhulka (Land Use Information Bulletin), summad ayaa lagu soo dhejinayaa dhismaha iyo ogaysiiska loo soo dirayo dhammaan dadkii mashruuca ka talo bixiyay.

Miyaan Samayn Karaa Is-bedel?

Haa waad samayn kartaa. Shirkadaha guryaha dhisa waxay yiraahdeen talooyinkii aanu ka helnay deriska iyadoo la isticmalaay habka dib-u-eegista naqshada inay ka caawisay iyaga sidii ay u horumarin lahaayeen mashaariicdooda. Talooyinka bulshada waxay ku keeneen shirkadaha guryaha dhisa inay wax ka bedelaan mashaariicdooda ama ay soo gudbiyaan mashruuc gebi ahaanba cusub kaasoo ka jawaabay walaacyada bulshada.

